



# Gunooyinka Guriyaynta iyo sharciga cusub ee Qofka Dawladu Biisho

**Haddan nahay Home Forward waxaan soo dhawaynaa dhammaan xubnaha bulshadeena soo galootiga ah.**

Waxaan doonaynaa inaan ogaato waxyaabaha saamaynta ku leh gurigaaga. Haddii aad tahay qof soo galooti ah aadna qaadato caawimaada guriyaynta ama gunooyinka kale ee dawlada, sharciyada cusub ee federaalka ayaa ku qaban kara.

## **Xagee ayaan ka ogaan karaa xaquuqdayda la xariirta guriyaynta iyo gunooyinka kale?**

- Hel talo bilaash ah oo badqabta. Wac laynkeena Tooska ah ee Gunooyinka Bulshada ee Xarunta Sharciga ee Oregon: **1-800-520-5292**
- Talo ka qaado qareen dhanka soo galootiga ood ka helayso <https://oregonimmigrationresource.org/>
- Booqo [www.protectimmigrantfamilies.org](http://www.protectimmigrantfamilies.org)

## **Waa maxay Qofka Dawladu Biisho ?**

Tijaabada *Qofka Dawladu Biisho* waa qayb ka mid ah hanaanka socdaalka. Dawlada federaalka ayaa dhawaan badashay sharciyada dadka soo galootiga ah ee hela gunooyinka dalwada, ayna kujiraan caawimaada dhanka guryaha.

## **Waxaan cabsi ka qabaa sharciga Qofka Dawladu Biisho. Ma igu habon tahay inaan iska joojiyo caawimaada guriyaynta ee aan helo ama gunooyinka kale?**

Ha joojin caawimaada guriyaynta ama gunooyinka kale ilaa aad barato waxyaabaha aad xaqa u leedahay. Sharciga Qofka Dawladu Biishoma qabanaayo qof kasta oo so galooti ah.

## **Sharciga Qofka Dawladu Biishoma saamaynayaa qoyskayga?**

Sharciga Qofka Dawladu Biishoma qabanaayo dhammaan dadka soo galootiga ah oo dhan. Si guud, sharciga Qofka Dawladu Biisho wuxuu qabanayaa shaqsiyaadka codsanaaya sharciga kaarka cagaaran (aqoonsiga Daganaanshaha Rasmiga ah ee Sharciga), dadka doonaaya inay soo galaan ama dib loogusoo celiyo Maraykanka. Ama shaqsiyaadka codsanaaya in loo kordhiyo mudada fiisaha ama dadka hadda soo galaaya wadanka.

## **Waa maxay noocyada caawimaada guriyaynta ee ku jira tijaabada Qofka Dawladu Biisho?**

- Kaarka Dookha Guriyaynta (Qaybta 8)
- Kaarka Guryaha Dawlada ama mashruuca ku salaysan (Qaybta 8)
- *Kuma jiraan:* Caawimaada kale ee guriyaynta, ayna ku jiraan Canshuur Dhaafka Guryaha dadka Danyarta ah (Low Income Housing Tax Credits , LIHTC), ilaa inta aysan sidoo kale ku jirin caawimaada wax kamid ah noocyada caawimaada kor ku qoran.

## **Haayada Home Forward ma i caawin kartaa?**

Home Forward waxay daryeelaysaa adigga iyo qoyskaaga. Home Forward kuma siin karto talo sharci ama socdaal. Waxaan filaynaa inaad la xariirto ilaha kor ku xusan si aad xog badan uga ogaato xuquuqdaada.

